

Shaqada magaalada ugu muhiimsan iyo adiga



Walxaha dabka ama gubashada sababa ee lagu rido bacaha casaanka amagaduudka

Tusaale: waxaa ka mid ah waraaqaha waxlagu qoro, baqshadaha, wargeysada, bugaagta, xayeysiiska, galka warqadaha, bugaagta cinwaanada lagu qoro, waraaqaha suuliga loo isticmaalo, kuwa rootiga lagu laabto, bacaha cuntada, kartoonaada, baakadaha lagu qaato alaabta. Waraaqaha wax lagu qalajiyo, bacda kartoona lagu dhejiyo, subaga rootiga la marsado, caaga subaga rootiga la marsado ka dhamaado, warqadaha hadiyada lagu duubto, bacaha sigaarka ku jira, koobabka kafeeyga (hal mar la isticmaalo), bacaha wax lagu duubto, saxamada waraaqaha ka sameeyan iyo wixii la mid ah.

Fiiro gaar! Dharka, kabaha aan haraga laga sameeyn iyo alwaaxda kama midaha qashinka dabka kiciya.

Qashinka haraaga waxaa lagu ridaa bacda cagaaran

Tusaale: qashinka cuntada ka hara, rootiga iyo keega, ismariska, khudrada, lafaha, qalofta ukunta, fiiltarka kafeeyga, qasharka kafeeyga, warqada caleenta shaaha, iyo wixii lamid ah.

Fiiro gaar! Haraaga suugada iyo maraqa waxaa lagu daadiyaa ama la raacsiiyaa meesha alaabta lagu dhaqo ama weelka lagu xalo.

Haraaga qashinka aan dib loo habeeyn karin

Tusaale: dharka, kabaha maryaha laga sameeyo, dhoobka, qalmaanta, dharka haraga ka sameeyan, dhoobka ashuunka laga sameeyo, gacmo gashiga (hansker), kadiifadaha, baakada sigaarka dhexdiisa ku jirta, waraaqaha aluminyamka, dharka hosta laga qaata ama laga xirto, xafaayada, bacda adag.

Fiiro gaar! Haraaga qashinka noocaan lagama faaideeysan karo, dibna looma habeeyn karo, mana la gubi karo.

**Finnmark
Ressursselskap**
www.finn-ress.no
Telefon 480 96600

Shirkada qashinka habeeysa